



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.bristol.sch.uk

Talaada 21^{da} Febraayo 2023

Gacaliyayaal Waalidiin iyo Daryeelayaal,

Ku soo dhawaada Xilliga 4. Marwalba farxad ayeynoo tahay inaan carruurta ku soo dhaweyno dugsiga aanna aragno iyagoo diyaar u ah xilli cusub ee waxbarasho.

Waxaan jeelaan lahaay inaan si mug leh aan ugu hambalyeyyo Fasalka 6 – inta uu dhammaanin xilligii hore, sida ay wadaagga ula sameeyeen kulanka guud ee annaga iyo qoysaska Fasalka 6. Hambalyo dhammaan Fasalka 6, si faseex ah ayaad u hadasheen oo aan dhammaanteen wada maqli karnay. Wuxuu ahaa kulan wanaagsan. Fasalka 6 dhammaantiin waa inaad u riyaaqdaan naftiinna waxaanna u mahadcelineynaa mar labaad qoysaska waqtii ku bixiyey in ay yimaadaan oo ay caawiyaan.

Waxaad kaloo aad ugu mahadsan tahay inaad carruurta waqtii ku keentid dugsiga— Dugsigu wuxuu billaawdaa 8:45am marka uu ganbaleelka dhaco waxaanna dooneynaa inaan hubinno in ay carruurta joogaan diyaarna u yihiin waxbarashada. Albaabka buluugga wuxuu furmaayaa 8:40am si aad waqtii ugu hesho inaad fasalka tagto si gambaleelka u dhaco 8:45, adigoo diyaar u ah maalinta. Fadlan ku dadaal inaad fasalka gasho 8:45. Albaabka weyn wuxuu xirmaayaa 8:50am. Marka haddii aad timaadid waqtigaas ka dib, waa inaad dugsiga ka soo gashaa dhinaca xafiiska.



Daqiqad walba waa mid la tiriyo waxaanna dooneynaa inaan hubinno in carruurta ay helaan waqtii buuxa oo waxbarasho ee ay xaqaa u leeyihiin. Oo keli ah 5 daqiqo oo soo daahid ah waxay u dhigantaa 3 maalmood oo waxbarsho dhuntay sannadkii.

Aad ayaad ugu mahadsan tiihiin taageeradiinna ee maalinta xuska Usbuuca Caafimaadka Maskaxda, waxaan uruurinnay £100.50. Guddiga Dugsigeenna waxay hadda la shaqeeynaayaan fasallada si loo go'aamiyo sidii lacagtaas loo kharashgareyn lahaa iyadoo qasdigu yahay taageeridda caafimaadka maskaxda ee dugsiga oo dhan.

Ugu dambeyn, waxaan dooneynaa inaan ku maqalno, qoysaska carruurta dugsiga maxaa yeelay waxaan dooneynaa inaan la shaqeeyno si shuraako ah si carruurtaada ay wax wanaagsan u helaan. Waxaa jira sanduuq buluuga ah oo xafiiska yaal oo aad dhamaal ku ridi kartid si aad noogu sheegto waxa wanaagsan iyo waxa ay tahay in ay hagaajinno.

Maalinta Buugaagta Dunida waa soo dhawdahay – waxaan dhawreynaa inaan ku aragno adigoo lebiska qofka jilaha xiran. (Waxaan ku siin doonaa warqad arrintaan la xiriirta. Fadlan fiiri taariikhaha xusuus-qorka maadaama usbuucaas wax badan ay dhacaayaan.

Mahadsanidiin,

Mrs L-H

Waxaan jeelaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii Mudane Rea ee xafiiska. Waaad naga soo wici kartaa 01173772630

La-dabbaaldeggaa Excalibur

Waad ku mahadsan tiihiin taageeradiinna xafladdaan ee fasaxa ka hor. Carruruutaa waa ay ku wanaagsanaayeen soo dhaweynta martida Excalibur iyo ka qeybgalka daahfurka xafladda iyo tallaalka geed.



Badbaadada internetka

Badbaadada internetka waa qeyb muhiim ah ee dunida aan hadda ku nool nahay. Fadlan fiiri mareegaha hoose si aad nooga caawintid in carruurta ay nabad qabaan. Haddii aad wax walaac ah aad qabto ama su'aalo, fadlan la hadal macallinka canuggaada.

Badbaadada internetka

Carruruutaa ma ku nabad qabaan internetka? Sideed ku ogaaneysaa? Mareegtaan hoose ayaan kaa caawinaaya.

Virtual Reality Headsets

<https://www.nspcc.org.uk/about-us/news-opinion/2022/christmas-vr-safety-advice-for-parents-metaverse/>

Fortnite

<https://www.internetmatters.org/hub/guidance/fortnite-battle-royal-parents-guide-keep-kids-safe-gaming>

Online software and gaming

<https://swgfl.org/assets/documents/online-safety-and-gaming.pdf>

Taariikhaha Xusuus-Qorka

27^{da} iyo 28^{ka} Feb booqasho Foyle's Book Shop iyadoo boonada World Book Day la sito.

28^{da} Feb Sheekooyinka seexashada waqtiga dugsiga ka dib – akhbaar dheeri ah waa la soo sheegi doonaa

Maalinta Mudaaharaadka 2nd – Dugsigu qeyb ahaan ayuu furanaan doonaa (fadlan imoow haddii warqad lagu siiyey ee laguugu casuumay inaad timaado)

3^{da} Maars u- lebisashada- Maalinta- Buugaagta Adduunka – Warqad weji-daboolid ayaan lagu siin doonaa.

21^{da} iyo 22^{da} Maars – Wada-Xaajoodka Waalidiinta/ Daryeelayasha.

Cabot's core values are:

Partnership Inclusion Excellence

